

Maansadii: Darartii Maandeeq Curiye: Kunciiil Qorax



Maansadii: Darartii Maandeeq"Dulmahaan u doodaDiracaan dhoweystaaDanyartiyo agoontaanDusha xanaf ka qabatiyoDaqarrada u diidaa.Babbadkiyo dabeeyshiyoDulduleelka hoosaanKa daardaariyaayooDugsi dhaxanta celiyiyoDayr baan u ahay wayn.Dalku waa dalkeeygiiDadku waa dadkeeygiiDiinta iyo dhaqankiyo Diirkiyo dubaaqiyoDareenkaan ka simannahay.Laba doodday waa dawLaba dirirtay waa duugDarma dhigasho waa gacalIs dulleyntu waa qurun Dadnimadana ku ma sama.Dayax shaniyo tobanooDusha sare ka soo baxaySacab laguma daarsheeDibnahaaga ka adkoow.Ruux lagu dul socon karoDadku yaanay kuu arag Dabuub aadan shaandheynWaligaa ha daabicin.Nin daneyste dhaansadoTiisuna ka dadantahayDoollar qaate qaa'ina Yaan duniddu kuu arag.Dulmi ruux u sacab tumaOo danaha gaarkaaDanta shacabka dhafsadaDa'yartiyo caruurtiyoYaan duqoowdu kuu arag.Afartaa dantaadiyoDuxda hadalka waayeeDammanoow ha sii deeynWaa dardaaran hadalkuye.Ninkuu digay wax kuu sheegNin ku diray ku darawaliDoc waliiba kuu wadayDusha haaman ka saarDacaydana ku soo qabay.Dib u gurasho waa baqadDigarogasho waa xeelIs dalluucin waa ceebIs duug duugid waa beenBareer dirirna waa guul.Qof ku dagay mar iyo labaYaan damacu kuu geeynHa u furin dibnaha ooDaris yaanu kula noqon.Hadduu yahay mid diirkiyoDadka adiga kuu xiga Doqon la ma dhoweysteeIs ka dabar waraabaha.Dulmi ruuxa ku la jacelAdigoon wax daannaaDusha sare ka gaarsiin Sidiid daad isaga moos.Dadka maanta jira iyoDunidaani waa rogan Danbi dhowr hadduu jirayMid dabaasha baa yimid.Afartaasi waa daawRuntoon daah ka qaadiyoXaq dillaacay weeyaanHa u qaadan dacar iyoWax dubaaqa kaa muda.Diiwaanka hadal galaDadnimana ku laran tahayDirac madal ka dhihi jirayDanbas ka ma kacaa yimid.Duul-duulka sheekadaHalkaan ula danleeyahayDaaha aan ka qaadeeDiiriye ku soo duruqNin dammani ma dhaanshaa ?Hal candho la' ma dihan tahay? Ciin daaq ma leeyahay?Daalac naasi yaa dhalay?Danbiiluhuna waa kuma?Aan dooda hadalkiyoTixda kuu daleeyeeHaddii aad nin door tahaySu'aalaha is dabayaanDag dag uga war-celiyoHa la daahin saaxiib.Dogobbada qaxaayiyoHanka yaa ka dhigay duug?Dagaallada sokeeyiyoDiirsooca yaa wada?.Dugsi dhaxanta celiyoYaa dumiyay qarankii?Diryaankaan baxaa iyoDoc ka yeerku waa ku ma?.Yaa dooxay maatida?Misna xiray dameerahaOo diliy miskiinnadaHaddii darajo lagu heloDowladnimadi yaa riday?.Daah ma dhaafee waa keeDaasadaha ninkee xaday Dacas qaate waa ku ma?Gabbal dumay sidiisiiYaa gubay dukaammada?.Horta yaa ku doortooMisne duubka kuu xirayDakadihii dalkeeniyoMeeday duunyadeenii?.Dihin weeye ciiddeeWaxa dahab ku hoos jiraYaa ka dooxay waliyooDadka baahi kaga tiray?.Danta lagama quusteeKolleey diifta nolashiyoIdin dubatay milicduyeDuurjoog mayska noqotaan?.Duuduubay hadalkooDunuunucu ma fiicneeWaxaan dooda maansadaDiiriyoow ku soo xirayMeeday darartii maandeeq?.?Curiye: Kunciiil Qorax